# Warbixinta Sharciga Senate-ka 577 ee Dembiyada Eexda ee (2019)

Guddiga Caddaalada Dembiyadda ee Oregon (Oregon Criminal Justice Commission)

01 Luulyo 2022

## Soo Koobidda Maamulka

Intii lagu jiray kulankii sharci dejinta ee 2019-kii, sharci dejinta ayaa ansixisy iyada oo Guddoomiyaha Gobolkuna saxiixday Sharciga Senate-ka 577. Qaybta 9 ee sharcigu waxay uga baahan tahay Guddiga Caddaalada Dembiyadda ee Oregon (CJC) in ay dib u eegaan dhammaan xogta ku saabsan dembiyada eexda iyo dhacdooyinka eexda ee aan dembiga ahayn si loo soo sheego natiijada sanad walba Luulyo 1. Tani waa warbixin sanadeedkii saddexaad iyo waxayna ka hadlaysaa xogta ku saabsan dembiyada eexda iyo dhacdooyinka eexda ee aan dembiga ahayn ee ka dhacay Oregon intii lagu jiray taariikh sanadeedkii 2020 iyo 2021. Qof kasta oo daneynaya in uu eego warbixinta oo dhan wuxuu sidaasi sameyn karaa isaga oo nuqul ka codsanaya Guddiga Caddaalada Dembiyadda oo laga helo 503-378-4830 ama iyada oo la galayo meeshan la sii gelayo: https://www.oregon.gov/cjc/CJC%20Document%20Library/SB577ReportJuly2022.pdf. Weydiimaha guud ee ku saabsan warbixintani waa in lagu hagaajiyo Guddiga Caddaalada Dembiyadda oo laga helo 503-378-4830. Su'aalaha gaarka ah oo ku saabsan waxa ay ka kooban tahay warbixintani waxaa lagu hagaajin karaa Ken Sanchagrin, Agaasimaha Guddiga Caddaalada Dembiyadda, oo laga helo 971-719-6000 ama ken.sanchagrin@oregon.gov.

Warbixinta buuxdaa waxay muujinaysaa xog kooban iyo falanqeynta dhabta ah ee dembiyada eexda iyo dhacdooyinka eexda ee aan dembiga ahayn oo laga helay ilo xogeed oo dhowr ah oo uu ku jiro Khadka Ka Jawaabida Eexda (BRH) oo ay aasaaastay Waaxda Caddaalada ee Oregon (DOJ) waxaa ka go'an caawinta dhibanayaasha, markhaatiyaasha, iyo soo sheegayaasha kale ee dembiyada eexda iyo dhacdooyinka eexda ee aan dembiga ahayn. Intaasi waxaa dheer, in warbixintu muujinayso xog ku saabsan dembiyada eexda la xiriira oo laga soo qaatay Nidaamka Warbixinta Ku saleysan Dhacdada Qaranka (NIBRS) ee Oregon oo ku yaala Booliska Gobolka Oregon (OSP) gudahiisa, xogta ku saabsan dacwad isku soo oogista dembiyada eexda oo ka socota saddex ah xafiisyada qareenada degmada ayaa ku lug yeeshay xog ururinta tijaabada ah ee lala yeeshay CJC, xogta xiritaanka dadka 'arrest' oo ka socota Nidaamka Xogta ee Fulinta Sharciga (LEDS) ee qaranka, xogta maxkamadda ee dembiyada eexda oo ka socota nidaamka xogta Odyssey ee Oregon, xogta isku xumida iyo xukunka ee dembiyada eexda oo ka socota Waaxda Asluubta ee Oregon (DOC).

Natiijooyinka Muhiimka ah

- Warbixinta ku saabsan Khadka tooska ah wuxuu kordhay 53% intii u dhaxaysay 2020 iyo 2021, iyada oo ahayd 1,101 oo noqotay 1,683. Dambiyada eexda ayaa noqday 28% ee warbixinada labada sanaba. Dhacdooyinka ka dhanka ah dadka Aasiyaanka ayaa kordhay ku dhawaad 200%, iyada oo dembiyada eexda ee ka dhanka ah dadka dadka Aasiyaanka ay kordheen 300%. [1] Dhacdooyinka eexda ee

[1] Khadka tooska ah ayaa bilaabay ururinta xogta ku saabsan dhacdooyinka eexda ee la xiriira dhacdooyinka gaarka ee caalamiga ah, bulshada iyo siyaasada, waxaana la arkay in uu kor u kacday warbixinta eexda ee ka dhanka ah dadka Madow/Maraykanka Madow ah oo waafaqsan dhaqdhaqaaqa Black Lives Matter ee xagaagii 2020, warbixinadii korodhka eexda ee ka dhanka ah dadka Aasiyaanka ee gu'gii 2020 ee barbar socday bilawgii cudurka baahsan ee COVID-19 ee ka jiray Maraykanka, iyo korodhkii sheegida macluumaad gaar ah 'doxing' taasi oo gogol

dugsiyada ayaa kordhay 300% muddadani, iyada oo ahayd 36 oo noqotay 157 warbixinood. Waxaa sidoo kale jiray korodh dhan 300% oo ah dhacdooyinka eexda oo lagu beegsanayo u doodayaasha Khadka tooska ah intii u dhaxaysay 2020 iyo 2021, taasi oo sii socotay ilaa 2022.

- Dadka Madow/Maraykanka Madow ah iyo Aasiyaanka ayaa ahaa dhibanayaasha ugu badan ee dhacdooyinka eexda la soo sheegay (25% iyo 12%, sida ay u kala horreeyaan) fal dembiyeedyada nacaybka ku dhisan (34% iyo 12%, sida ay u kala horreeyaan). Inta badan dembiyada eexda ee ka dhanka ah dadka Aasiyaanka 95%), dadka Madow/Maraykanka Madow ah (94%), dadka U dhashay Hawaii ama Jasiiraddaha Baasifiga ee kale (100%) iyo Hispanic (88%) u soo sheegeen Khadka tooska ah ee 2021 waxaa keenay jinsiyadda dhibanaha. Dhibanayaal caddaan ah oo yar (n=2) ayaa lagu beegsaday isirkooda dartiis balse taasi beddelkeeda waxaa lagu beegsaday iyada oo ku saleysan dookha galmo (56%), is aqoonsiga jinsi ahaaneed (28%), iyo diinta (28%).
- Khadka tooska ah wuxuu la kulmay korodh dhan 650% ee isa soo gudbinta ka socotay hay'adaha iskaashiga bulshada intii u dhaxaysay 2020 iyo 2021 (22 vs. 165), oo soo jeedinayay wacyigelinta bulshada ee DOJ iyo dhisida xiriir lala leeyahay ururada dhaqanka, dadweynaha, u gaarka ah ee saleysan bulshadu (CBOs) ay yeelanayso saameyn wanaagsan.
- Xogta fulinta sharciga ee NIBRS ayaa muujisay in 300 oo dembiyada eexda ah *loo soo sheegay* hay'adaha fulinta sharciga ee Oregon (LE) sanadkii 2021, kaasi oo tilmaamaya hoos u dhac dhan 15% oo ku yimid soo sheegida ka socotay 2020. Iyada oo waafaqsan qaabka Khadka tooska ah, dhibanayaasha ah dadka Madow/Maraykanka Madow ah (90%) iyo dhibanayaasha ah Aasiyaanka (87%) ayay u badnayd in lagu beegsado jinsigooda dartiis. Dhibanayaasha caddaanka ah ayaa la beegsaday iyada oo ku saleysnayd dookha galmo (31%), qowmiyadda/dalka laga soo jeedo (24%), diinta (7%), waxayna sababtu ahayd iyaga oo loo arkayay in ay yihiin dadka Madow/Maraykanka Madow ah (9%). Kaliya 11% oo dhibanayaasha caddaanka ah ayaa la beegsaday iyada oo sababtu ahayd eex ka dhan ah caddaanka.
- Xogta gobolka oo dhan oo ka socota LEDS ayaa tilmaamaysa in 2021 ay jireen 117 *xiritaanka dad 'arrests'* oo lagu soo eedeeyay Dembiga Eexda oo ah Darajada Koowaad (ORS 166.165) ama Dembiga Eexda oo ah Darajada Labaad (ORS 166.155) oo ka jira Oregon, oo ah korodh dhan 50% laga soo bilaabo 2020.
- Xogta dacwad isku soo oogida ee eedaysanayaasha qaangaarka ah ayaa laga soo ururiyay saddex ah xafiisyada qareenada degmada – Degaannada Multnomah, Lane, iyo Benton ee 2021. Degaannadaasi waxay yeesheen 66 oo dembiyada eexda ah *oo loo gudbiyay* si loogu tixgeliyo dembi ay ku soo ogaan hay'adaha fulinta sharcigu (LEAs). Kuwani, 54 ka mid ah waxaa faylka la gashay in ay yihiin dembiyada eexda, iyada oo 19 lagu soo eedeeyay in ay yihiin Dembiga Eexda oo ah dambiyada weyn ee Darajada Koowaad. Inta badan kiisaskani waxaa loo gudbiyay oo laga xareeyay Degaanka Multnomah.
- Xogta gobolka oo dhan ee ka socota Maxkamadda Oregon ama nidaamka Odyssey waxay muujinaysaa in sanadki 2021, ay jireen 130 kiis oo ay ku jireen *eedaymo la gudbiyay* oo ah Dembiga Eexda oo ah Darajada Koowaad (ORS 166.165) ama Dembiga Eexda oo ah Darajada Labaad (ORS 166.155). Kuwani, 47 ka mid ah waa la laalay – 20 ay natiijadoodii noqotay in la isku xukumo dembiga eexda, 11 ay natiijadoodii noqotay in eedaymihii la joojiyay, 14 ay natiijadoodii noqotay xukunka eedaymo kale, mid ay natiijadiisii noqotay in dib loo dhigo, iyo mid ay natiijadiisii noqotay in la joojiyo.
- Sida ay dhigayso xogta gobolka oo dhan ee ka socota Oregon DOC, 20 eedaysane ayaa lagu helay dembiga eexda sanadkii 2021. Kuwani, 18 ka mid ah waxaa lagu xukumay in ay galaan muddo tijaabin ah 'probation' iyada oo 2 ay heleen xukun xabsi ah. Tani waxaa ku jirta xukunka dembiyada weyn oo kaliya, iyada oo DOC aysan haysanin xog buuxda oo ku saabsan xukunka dembiyada fudud.

---

xaar u ahayd Doorashada Madaxweynaha Maraykanka ee 2020. Korodhka ku yimiday eexda ee ka dhanka ah dadka Aasiyaanka ayaa sii socotay 2022.

- Iyada oo la isbarbardhigayo Ra'yi urrrurinta Qaranka ee Dhibaataada Dambiyeed iyo ra'yi ururinta dadka ku nool Oregon waxay tilmaamaysaa in dhacdooyinka eexda iyo dembiyada eexda ee ka dhanka ah xubnaha ka tirsan qabiilka Hindida, dadka Madow, Dadka dhulka loogu yimid, Dadka Midabyada kala duwan leh (BIPOC), iyo dadka dhallinyarada ah weli si hooseysa 'underreported' loogu soo sheego/wargeliyo Khadka tooska ah iyo LE.

<u>Talo soo jeedin</u>

1. Khadka tooska ahi waa in uu u faa'iideeyaa xiriirada jira ee lala leeyahay ururada dhaqanka, dadweynaha, u gaarka ah ee CBO-yada iyo Qabiilada si macluumaad loola wadaago BIPOC iyo bulshooyinka naafada ah oo ku saabsan adeegyada Khadka tooska ah si loo xaqiijiyo in ilo ku habboon la siiyo dhibanayaasha iyo dadka ka badbaada dembiyada iyo dhacdooyinka eexda. CBO-yada iyo Qabiilada iyo LE waxay si ballaaran u wadaagi karaan macluumaadka la iskala soo xiriirayo, iyada oo haddii ay suurtagal tahay, bixiyaan meelaha dhanka internet-ka ee laga sii gelayo Khadka tooska ah.
2. Khadka tooska ahi waa in uu u faa'iideeyaa dadaalada wacyigelinta iyo iskaashiga ee hadda jira ee lala leeyahay Waaxda Waxbarashada si loo xaqiijiyo in maamulayaasha dugsiyada iyo barayaasha ka warqabaan adeegyada uu bixiyo Khadka tooska ah. Waa in ay sii wadaan bixinta waxyaabo wata soo koobida adeegyada Khadka tooska ah iyo macluumaadka la iskala soo xiriirayo, oo sii wadaan dadaalada wax lagu soo bandhigayo oo kooxaha wada hadalku la yeelanayaan barayaasha si loo dhiso xiriiro la leeyahay oo daaha looga qaado xeelado si loo gaaro dhacdada eexda iyo dhibanayaasha dembiga eexda ee dadka yar yar.
3. LEA-yadu waa in ay u qoondeeyaan barta xiriirka dembiyada eexda ee hay'ada kasta gudaheeda. Tababar joogto ah waa in la bixiyaa oo ku saabsan waajibaadka ka socda ORS 147.380(2) ee loogu talagalay LE si ay *dhacdooyinka* dembiyada eexda oo dhan ugu soo gudbiso Khadka tooska ah, oo ku saabsan habka ugu fiican ee wax loo qabto ee dhibanayaasha *dembiga* loogu soo gudbiyo Khadka tooska ah, iyo ku saabsan farsamooyinka baariseed ee ka warqabka dhibaatooyinka naxdin leh. [Xirmada Ka Jawaabida Eexda ee Fulinta Sharciga DOJ] ee Juun 2020 loo soo saaray dhammaan Oregon, Qabiilka, iyo hay'adaha federaalka ee LE iyo qareenada degmada ayaa ah ilo wanaagsan. Dhisida kalsoonida lala leeyahay bulshooyinka ay saameysay sinnaan la'aantu waxay muhiim u tahay wanaajinta soo sheegista dembiga eexda: hay'adaha waxaa lagu dhiirigelinayaa in ay bilaabaan – ama sii wadaan hirgelinta – talaabada(ooyinka) dhisida kalsoonida rasmiga ah ee qorshaha istiraatiijiyadeed ee hay'ada, kaasi oo ay tahay in lagu dhiso dhaqdhaqaaqyada caadiga ah ee booliska.
4. LEA-yada waa in ay dejiyaan oo fuliyaan borotokoolka gudbinta ee BRH, tusaale, xirmada daryeelka oo leh macluumaad la iskala soo xiriirayo oo loogu talagalay Khadka tooska ah iyo ururada kale ee bulshada ee khuseeya si loo siiyo dhibanayaasha dembiga eexda iyo dhacdooyinka eexda labadoodaba ka dib marka la qaato warbixinta ugu horeysa. Intaasi waxaa dheeer, xirmada daryeelka waa in ay dhibayaasha ku wargelinaysaa tallaabooyinka xiga, waqtiga, iyo natiijooyinka suurtagalka ah.

Warbixintani waxay bixinaysaa fiirinta hordhaca ah ee dadaalada xog ururinta oo ku jira bilowgooda. Daraasaduhu waxay muujinayaan in xogta noocaasi ah ay inta badan dhayalsato baaxada dhibaatada iyada oo sababtu tahay warbixinta oo loo soo sheego si aad u hooseysa. [2] Warbixin dheeraad ah oo dabagal ku sameynaysa hawsha dkiiska dembiga eexda si daaha looga qaado caqabada la xiriira go'aanka kama dambeysta ah ee kiiska ayaa soo socda. Wareysiyada iyo/ama ra'yi ururinta DA-yada degaanka iyo LE ee la shaqeeya dhibanayaasha dembiga eexda ayaa la sameyn doonaa si loo ogaado caqabadaha iyo yaraanta ilaha ee xaddida DA-yada iyo LE in ay baaraan, maxkamadeeyaan, iyo in ay ciqaabaan dembiyada eexda. Intaasi waxaa dheer, in talooyinka bulshada u gaarka ah ee ku saleysan xogta bulshada u gaarka ah ee laga helay Khadka tooska ah, xafiistada LE, DA-yada, maxkamadaha, iyo DOC ay soo socoto.

---

[2] Pezzella, F.S., Fetzer, M.D., Keller, T. (2019). Maqaalka The Dark Figure of Hate Crime Underreporting. American Behavioral Scientist. doi:10.1177/0002764218823844.